

# Medicare iyo Apple Health Classic Medicaid

## Su'aalaha Soo Noqnoqda

### Waa maxay farqiga u dhaxeeya Medicare iyo Apple Health Classic Medicaid?

Labada barnaamijba waxaa loogu talagalay shakhsiyadka ay da'doodu tahay 65 ama ka weyn, kuwaas oo indho la' ama naafo ah, ama u baahan adeegyo iyo taageero muddo dheer. Kala duwanaanshaha barnaamijka waxaa ka mid ah:

- Medicare waa barnaamijka caymiska federaalka ee uu maamulo Maamulka Damaannada Bulshada (SSA) mana lahan xad dakhli.
- Apple Health Classic Medicaid waxaa maamula Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) xaq u yeelashada iyo isqoritaankanna waxaa loo maraa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DHS). Xaq-u-yeelashadu waxay ku saleysan tahay dhowr arrimood, sida dakhliga, kheyraadka, degganaanshaha, iyo jinsiyadda ama xaaladda socdaalka.

### Miyaal loo baahan yahay in aan codsato Medicare si aan xaq ugu yeesho Apple Health Classic Medicaid?

Maya, looma baahna in aan codsato Medicare ka hor inta aadan codsan Apple Health Classic Medicaid. Wuxaad kaloo xaq u yeellan kartaa Medicare haddii ay da'daadu ka yar tahay 65 oo Aadna tahay naafo qaadanaya Apple Health.

### Sideen caawimaad ugu heli karaa codsigeyga Medicare?

Wuxaad heli kartaa caawimo adiga oo wacaya SSA ama la xiriirraya La-taliyeyaasha Dheefaha Caymiska Caafimaadka Gobolka Washington (SHIBA). SHIBA waxay bixiyaan adeegyo bilaash ah oo sir ah looguna talagalay Medicare iyo kaalmada kale ee daryeelka caafimaadka.

- SSA:
  - **Telefoonka:** 1-800-772-1213 (TTY: 1-800-325-0778)
  - **Online-ka:** [ssa.gov](http://ssa.gov)
- SHIBA:
  - **Telefoonka:** 1-800-562-6900
  - **Shakhsi ahaan:** [insurance.wa.gov/find-local-shiba-office](http://insurance.wa.gov/find-local-shiba-office)
  - **Adeegyada Xiriirkha Luuqadda:** [insurance.wa.gov/language-link-services](http://insurance.wa.gov/language-link-services)

### Miyaan heli karaa Apple Health Classic Medicaid iyo Medicare waqtii isku mar ah?

Haa, waxaa jira faa'iidooyin ay leeyihiin lahaanshaah Apple Health Classic Medicaid iyo Medicare. Apple Health waxay gacan ka geysataa bixinta kharashka aysan Medicare bixin sida lacagaha laga jari karo, lacag-bixinnada caymiska ee la wadaago, gargaarka maqalka, iyo adeegyada ilkaha. Apple Health Classic Medicaid sidoo kale wuxuu leeyahay Barnaamijka Kaydka Medicare (MSP) ee gacan ka geysan kara bixinta lacagaha joogtada ah ee caymiskaaga Medicare.

## **Waa maxay Barnaamijyada Kaydka Medicare?**

Barnaamijyada Kaydka Medicare ayaa ka caawiya shakhsiyaadka bixinta lacagahooda caymiska ee joogtada ah. Tani waxaa ku jira lacagaha joogtada ah ee caymiska ee Qaybta A iyo Qaybta B iyo sida suuragalka ah kharashaadka kale ee la xiriira Medicare, sida caymiska-la-wadaago iyo lacagaha laga jari karo.

## **Kheyraadka**

### **Medicare**

- [Damaannadeyda Bulshada | SSA](#)
- [Dheefaha Medicare | SSA](#)
- [Foomamka, caawimaad, & kheyraad | Medicare](#)
- [Barnaamijka Caawimaadda Dheeraadka ah: Kaalmada Dakhliga-Hooseeya ee Qaybta D ee Medicare \(medicareinteractive.org\)](#)

### **Barnaamijyada Kaydka Medicare:**

- [Buugyarahaa Barnaamijyada Kaydka Medicare| HCA](#)
- [Barnaamijyada Kaydka Medicare | HCA](#)

### **Codso Apple Health Classic Medicaid iyo/ama Barnaamijka Kaydka Medicare:**

- Codsiga barta internet-ka ee DSHS: [Washington Connection| DSHS](#)
- Codsiga waraaqda ah: [Codsiga Barnaamijyada Kaydka Medicare| HCA](#)